



Kugu socota adigaaga iska tallaalaya covid-19

Adigaaga lagu siiyay fursadda Tallaalka looga hortago cudurka [Covid-19] laga yaabee in aad su'aalo qabtid inta aadan go'aan gaarin. Macluumaadka taageero ayuu kuu noqon karayaa tallaalka ka hor, marka lagu tallaalayo iyo tallaalka kaddib ba.

Cudurka covid-19 waxaa keena feyruus. Inta badan dadka uu covid-19 ku dhacayo aad uguma xanuunsadaan, laakin qaarbaa aad ugu xanuunsada. Haddii ay ugu xumaato waxaa dhici karta in uu qofku cudurka u dhinto.

Tallaalku adiga iyo dadka kalaba wuu idin badbaadin badbaadinayaa

Tallaalka ka dhanka ah covid-19 wuxuu ka badbaadin karayaa in uu cudurku kugu dhacayo, taasoo xitaa yareyneysa khatarta ah in aad adigu qaadsii sid dad kale. Ugu dambeyn waa la joojin karaa faafitaanka cudurka.

Yaa lagu siiyay fursadda tallaalka?

Waqtiga iminka ah waxaa tallaalka ka dhanka ah covid-19 lagu siiyay fursadda dadka jira 18 ama ka waaweyn, sida ku xusan talooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada. Kuwa khatarta kugu jira in ay aad u xanuunsadaan ayaa marka hore lagu siiyay fursadda tallaalka.

Waxaa loo baahan karaa in xaalad kasta gaar loo qiimeeyo

Billawga hore tallaalka lama siinayo dadka jira 17 sano ama ka hooseeya ama dumarka uurka leh. Laakinse xaaladdu waxay isu beddeli kartaa hadba sida ay aqoontu u kororto. Iyadoo ku xiran tallaalka iyo dhibaataada aasaasiga ah ee qof walba u gooni ah, waxaa dhici karta in xaalado gaar ah tallaalka lagala sheekeysto dhakhtarka wax daweynaya.

Mar kasta oo ay qofka da'diisu weynaato waa ay kordheysaa khatarta ku aaddan in uu qofku aad u xanuunsado

Khatarta ah in aad covid-19 aad ugu xanuunsatid wey kordheysaa mar kasta oo aad sii weynaatid, gaar ahaan haddii aad jirtid 70 sano ama ka weyntahay. Waxaa intaas dheer in dadka qaba cudurrada qaarkood ay khatar dadka

Tallaalka kahor

Tallaalka ka dhanka ah covid-19 maaha mid khasab ah.

Adigaaga raba in inta aadan go'aan gaarin aad wax dheeri ah tallaalka ka ogaatid warbixin iyo macluumaad rasmi ah waxaa laga aqrisan karaa 1177, Hey'adda caafimaadka bulshada iyo Hey'adda dawooyinka, bogga soo socda ka eeg macluumaadka lagala xiriiri karo.

Sidan ayuu tallaalku u dhacayaa

Tallaalka kahor waxaad buuxineysaa caddeyn caafimaad.

Kalkaaliso caafimaad ayaa iyadoo cirbad kaashaneysa tallaalka kaa siin doonta garabka hoostiisa. Haddii aad u baahantahid in laba jeer lagu tallaalo isku halka nooc ee tallaalka ayaa labada jeerba lagu siin doonaa.

Kaddib marka qofka lagu mudo cirbadda waa iska caadi in uu damqasho dareemayo, in uu daal dareemayo, in uu ka bararo garabka hoostiisa ama in ay meeshu cuncunto. Dadka qaar waxaa ku dhici kara qandho waqti gaaban ah, madax xanuun iyo dareen guud oo uu qofku dareemayo in uu xanuunsanyahay. Dhammaan waxyaabahaas waa falcelin dabiici ah oo uu sameynayo difaaca jirku. Calamadahani badanaa waa kuwo khafiif ah oo iska dhamaanaya hal maalin kaddib. Falcelinnada xasaasiyadeed maaha kuwa caadi ah.

Tallaalka kaddib

Haddii adan fiicneyn ama aad tallaalka kaddib welwel dareentid waa in aad la xiriirtaa laamaha caafimaadka si calaamadahaaga baaritaan loogu sameeyo, iyadoon taas loo eegeyn in lala xiriirin karo tallaalka ama in kale.

Laamaha caafimaadku waxay Hey'adda dawooyinka u gudbinayaan wixii laga shakisanyahay oo saameyn dhinaceed ah www.lakemedelsverket.se/rapportera.

kale ka badan ugu jiraan in uu ku dhacayo covid-19 khatar ah, iyadoo aan taas loo eegeyn da'da uu qofku jiryo.

Wuxuu abuurayaa difaac ka dhan ah cudur khatar ah

Tallaalka kaddib wuxuu difaaca jirku dhisayaa difaac ka dhan ah covid-19. Laakinse ma hubna in dhammaan dadka la tallaalayo ay wada yeelanayaan difaac dhan walba leh. Taasina waxay khuseysaa tallaallada oo dhan, ee maaha wax u gooni ah kuwa ka dhanka ah covid-19.

Laakin sidaas oo ay tahay waa ey yaraanaysaa khatarta ah in aad si khatar ah ugu xanuunsatid cudurka.

Marka tallaalka ugu dambeeya la qaato kaddib wuxuu difaacu buuxsamayaa hal toddobaad ka dib

Iyadoo ku xiran hadba tallaalka la adeegsaday, inta jeer ee loo baahanyahay in tallaalka la qaato wey kala duwantahay si difaac fiican loo helo. Sida xaaladdu iminka tahay waxaa loo baahanyahay in laba jeer tallaalka la qaato. Waxay qiyaas ahaan qaadaneysaa hal usbuuc inta uu jirku difaac buuxa ka yeelanayo, kaddib marka la qaato tallaalka ugu dambeeya.

Adigaaga qof xigto ah ka taageeraya go'aansashada tallaalka

Adigaaga qof xigto ah ka taageeraya go'aansashada tallaalku waxaad u baahan kartaa in haddii aad su'aalo qabtid aad la hadashid dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad. Waxay taasi gaar ahaan khuseysaa haddii qofka xigtada ahi uu u nugulyahay in uu si fudud u dhiigbaxyo, uu qabo cudurro u qarsoon ama dawooyin uu qaato oo saameynaya difaaca jirka.

Wax dheeraad ah oo ku aaddan covid-19

Calaamadaha cudurka covid-19 wey kala duduwanyihiin marka uu dadka ku dhacayo. Badanaa waxay u egyihiin hargab ka xoog badan kan caadiga ah ama infekshin hargab. Qandho iyo qufac ayaa ah calaamadaha ugu badan ee cudurka, laakin mid ama dhawr ka mid calaamadaha soo socdana wuu yeelan karayaa cudurka: dhibaato xagga neefsashada ah, diif, curan, dhuun xanuun, madax xanuun, lallabbo, saxaro jilacsan, narbarro korka ka soo baxa, dhedhenka oo luma ama hoos u dhaca, murqo iyo kala goysyo xanuun.

Diiwaanka qaranka ee tallaalka

Dhammaan tallaallada ka dhanka ah covid-19 waxaa lagu qorayaa diiwaanka qaranka ee tallaalka. Macluumaadka la diiwaan gelinayo waa nambarrada aqoonsiga ama nambarrada ku meel gaarka ah ee aqoonsiga, taariikhda qofka la tallaalay, tallaalka la adeegsaday kan uu yahay, nambarka dufcadda, laanta caafimaadka ay tallaalka mas'uulka ka ah, nambarka feylka tallaalka ka dhanka ah covid-19.

Waxaa taas loo sameynayaa si tallaalka loola socdo. Macluumaadka waxaa loo badbaadin badbaadinayaa si boqolkiiba boqol aamin ah oo lama geli karayo iyadoo la adeegsanayo diiwaanka caafimaadka bukaanka. Sida uu qabo xeerka badbaadin ta macluumaadku (GDPR) waxaad xaq u leedahay in macluumaadka lagu soo bixiyo.

Sii wad in aad adigu is ilaalisid, dadka kalana ilaalisid

Adigaaga is tallaalay waxaad, sidaas oo ay tahay, u baahantahay in aad sii waddid raacitaanka talooyinka si loogu hortago faafitaanka cudurka.

La soco sida ay wax u socdaan siina wad in aad

- Guriga joogtid haddii aad xanuunsantihid
- Masaafu u jirsatid dadka kale
- Inta badan gacmaha dhaqdid.

Macluumaadka wax soo saarka ee tallaalka

Macluumaadka iminka taagan ee tallaalka waxaad si digital ah uga heleysaa barta intarneeetka ee Hey'adda dawooyinka. Barta waad ka daabacan kartaa macluumaadka ama toos ayaadba uga akhrisin kartaan barta intarneeetka.

Warbixin dheeri ah iyo macluumaadka xiriirka

Macluumaad ku aaddan wax adiga kugu khuseeya, halka aad deggantihid:

- Hagaha caafimaadka ee1177, – [1177.se](https://www.1177.se)

Talooyinka xagga tallaalka iyo ka hortagidda faafitaanka cudurka:

- Hey'adda caafimaadka bulshada – [folkhalsomyndigheten.se](https://www.folkhalsomyndigheten.se)

Tallaalka looga hortago cudurka [Covid-19]:

- Hey'adda dawooyinka – [lakemedelsverket.se/coronavaccin](https://www.lakemedelsverket.se/coronavaccin)
- Macluumaadka dawooyinka, tel 0771-46 70 10

Jawaabo ku aaddan su'aalaha guud ee covid-19 ee ay muwaadiniintu qabaan:

- [krisinformation.se](https://www.krisinformation.se)
- 113 13 – nambarka qaranka ee macluumaadka